

# Sidee ayaan u wareejinayaa xisaabtayda kaydka guriga?

## Wareejinta kaydka guriga iyada oo la isticmaalayo BankID

1. Booqo [danskebank.se/hsb](https://danskebank.se/hsb) oo dhagsii linkiga 'Flytta bosparande' badhanka ah. Kadibna riix 'Flytta bosparande med BankID' badhanka ah.

2. Ku gal BankID-ga moobaylkaaga.

3. Sheeg faahfaahintaada xiriirka oo oggolaansho sii xogtaada shakhsiga ah in laga hawlgalo. Riix batoonka 'Nästa'.

4. Isku diiwaan gali in aad tahay macmiilka Danske Bank kana jawaab su'aalo dhowr ah oo bangiyada oo dhan ay tahay in ay weydiiyaan macaamiishooda. Su'aaluhu waxay la xidhiidhaan sida aad u isticmaali doonto xisaabaha bangiga, iyo wixii lacago iyo adeegyo ah.

Ka dib dhagsii 'Fortsätt' button. Waannu kula soo xiriiri doonnaa haddii aannu kaaga baahanno macluumaad dheeraad ah.

Macluumaad kusaabsan sababta aannu su'aalaha dadka u waydiino waxaad ka heli kartaa halkan [www.swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/](https://www.swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/).

5. Xaqiiji dayntaada canshuurta adigoo ku galaya BankID-gaaga. Hadda waxa aad u diiwaan gashan tahay in aad tahay macmiilka Danske Bank.

6. Xaqiiji ka wareejinta akoonkaaga kaydka guriga Swedbank iyo furitaanka akoonka dhigma ee Danske Bank.

Sidoo kale waxaad aqbashaa in aad u ogolaato Danske Bank in uu la soo baxo macluumaad ku saabsan lambarrada akoonkaaga iyo lacagaha la xiriira HSB Bospar ee ka imaanaya Swedbank ee soo maraya HSB, si loo ilaaliyo wareejinta haraagaaga loona maal galiyo sheer lahaanshaha Danske Bank.

Kaddib riix 'Nästa'.

7. Akhri dhammaan heshiiska si aad u hubiso in wax walba ay saxan yihiin, ka dib riix batoonka 'Signera'.

Ku gal BankID gaaga. Ka dib waxa aad heli doontaa macluumaad ah in heshiiska la meel mariyay.

## **Macaamiisha jecel in ay furtaan HSB Depå ayna bilaabaan in ay kayd sadaan si bille ah:**

8. Riix batoonka 'Till internetbanken'. Aqbal heshiiska bangigayaga online-ka ah ee Hembanken.

9. Riix xiriiriyaha bogga hore ee 'Öppna HSB Depå för fondsparande'.

10. Dhagsii badhanka 'Beställ'.

11. Akhri dhammaan heshiiska kuna xaqiiji BankID-gaaga.

12. Bilow in aad si bille ah u kaydsato adoo riixaya xiriiriyaha 'Kom igång med ditt månadsparande i fonder'.

13. Dooroo lacagta/lacagaha, tirada iyo waqtiga ugu horeeya ee wareejinta.

14. Ku xaqiiji BankID-gaaga.

Macaamiisha ku leh HSB Depå (caadiyan HSB Fondkonto ee Swedbank) kuwaasoo jecel in ay bilaabaan kaydinta si bil-le ah:

15. Aqbal heshiiska bangigayaga online-ka ah ee Hembanken.

16. Riix xiriiriyaha 'Månadspar fonder' ee ku yaal bogga hore.

17. Dooroo lacagta/lacagaha, tirada iyo waqtiga ugu horeeya ee wareejinta.

18. Ku xaqiiji BankID-gaaga.

**Macaamiisha jecel in ay galaan bangigayaga online-ka ah ee Hembanken si ay u arkaan wax soosaarka kaydinta guriga:**

19. Aqbal heshiiska bangigayaga online-ka ah ee Hembanken.

20. Bogga hore ee websaytka bankiga online-ka ah waxaa ku jira xiriiye yaasha wax soo saarka kaydinta guriga iyo kaydinta bil-laha ah. Xasuusnow in aad u baddasho qaabka bankigaagu u shaqaynayo hadda akoon kaaga HSB Bosparkonto ee Danske Bank. Lacagta loogu tala galay kharashka saamiga waxaa si iskeed ah looga soo saari doonaa HSB Bosparkonto kaaga taariikhda la doortay.

Waxa aan xawilaadda u diri doonaa Swedbank waaxanna hubin doonaa in lacagta/hantida ay gasho akoonnadaada Danske Bank 1 ilaa 4 asbuuc gudahood.

#### **Wareejinta kaydka guriga ilmaha yar**

1. Booqo [danskebank.se/hsb](https://danskebank.se/hsb) oo riix badhanka buluuga ah ee 'Flytta bosparande åt minderårig'.

2. Waxaad intaa kadib arki doontaa su'aalo dhawr ah oo kusaabsan ilmaha iyo masuulkiisa(adiisa). Kuwani waa su'aalo ay tahay in dhammaan bangiyadu ay waydiyaan macaamiishooda. Su'aaluhu waxay la xidhiidhaan sida ilmahaagu u isticmaalayo xisaabtooda bangiga, iyo wixii lacago iyo adeegyo ah. Macluumaad kusaabsan sababta ay tahay inaannu su'aalo kuu waydiino waxaad ka heli kartaa halkan ([swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/](https://swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/)). Ka dib dhagsii 'Fortsätt' button.

Xisaabaha iyo wixii sanduuqyo ah ee loo dalbayo ilmaha waa in lagu calaamadiyaa foomka mar dambe. Waxaad dooran kartaa inaad dhigto HSB Bosparkonto ama HSB Fasträntekonto, ama inaad dhigto sanduuqyada xisaabta haynta ilmaha. Waxa kuugu fiicani waxa uu ku xidhan yahay inaad kaydsanayso muddada dheer iyo ta gaaban, iyo halista weyn ee aad u badheedhayso.

Waxaad dalbi kartaa oggolaanshaha masuulada si ay markaa fursad ugu helaan inay arkaan xisaabta ilmaha iyo xisaabta haynta ilmaha. Sidoo kale waxaad dalbi kartaa oggolaanshaha masuulada si markaa mid kasta uu lacag uga saari karo xisaabta iibsan karo iibinna karo sanduuqyada xisaabta haynta ilmaha.

Haddii aad dalbato HSB Depå för fondsparande, waxaad dooran kartaa inaad dhigto qadar bille ah sanduuqyada adigoo dhag siinaya 'Fonder att välja' kadibna sanduuqa(yada) aad rabto inaad ku maalgalisoo dhigaaladaada. Haddii aad rabto inaad dhigto HSB

Fasträntekonto, waxaad u baahan tahay inaad kala xidhiidho Adeegga Macmiilka (0752 48 10 20).

3. Isku-tallaab ku dhig sanduuqa muujinaya inaad rabto xirista xisaabaha HSB ee ilmaha ee Swedbank una wareejinayso Danske Bank. Buuxi lambarada xisaabta ee waxyaabaha HSB ee ilmaha ee Swedbank (HSB Bosparkonto, HSB Fondkonto ama HSB Fasträntekonto).

4. Sawir ama scan-garee kaarka aqoonsiga wakiilka (liisanka darawalnimada, baasaboorka ama kaarka aqoonsiga), ka dibna gali. Haddii canuggu leeyahay labo wakiil, kaarka aqoonsiga labadoodaba ayaa loo baahan yahay in la sawiro ama la iskaan-gareeyo kaddibna la galiyo foomka.

Bilow adiga oo sawirrada aqoonsiga wakiilka ku qaadaya taleefoonkaaga gacanta. Intaa ka dib waxa aad teleefoon kaaga gacanta ka gali kartaa ciwaan kaaga iimaylka waxaad na ku lifaaqi kartaa sawirrada iimayl aad adigu isu dirayso. Ka dib iimayl kaaga ka gal kombuyuutarkaaga kuna kaydi sawirka(rada) kombuyuutarka. Intaa ka dib waxa aad ka sii wadi kartaa codsigaaga kombuyuutarkaaga adigoo riixaya batoonka 'Ladda upp dokument' ee u dhow qaybta hoose ee foomka. Gali sawirrada dhammaan Aqoonsiyada wakiillada.

5. Gudbi dalabkaaga adigoo dhag siinaya badhanka Send (Dir). Waxa aad kadibna arki doontaa sanduuqa cagaarka xaqiijinta ee muujinaya arjigaaga in la heley.

Waxaannu ku dadaali dalabka iyo waraaqaha la soo diro in lagu ansixiyo dhawr maalmaha shaqada ah gudahood. Waannu kula soo xidhiidhi doonaa haddii aannu u baahanno wax macluumaad oo dheeraad oo dalabka khuseeya. Haddii arjigaagu dhamaystiran yahay, heshiis ayaa laguugu soo diri doonaa shan maalmood oo shaqo gudahood. Waxa kaas saxeexi doona dhamaan koriyayaasha. Haddii koriyhu uu leeyahay BankID, waxa aanu kusoo diri doonaa iimeel marka heshiisku uu diyaar yahay ee la dhijitaal ahaan lagu sameexayo. Haddii hal ama wax ka badan oo koriyayaal ahi ayna lahayn BankID, heshiiska isaga oo daabacan waxaa lagu soo diri doonaa boosta.

6. Dhamaan koriyayaasha waa inay akhriyaan heshiiska oo ay eegaan in wax kastaaba saxan yahay, oo ay kadibna saxeexaan/elektoroonig ahaan ku saxeexaan. Ugu danbayn, haddii aad heshi heshiiska daabacan, waa inaad kusoo celisaa bushqada lagu

siiyay. Xaqiijin ayaa laguugu soo diri dhawr maalmaha la shaqeeyo ah gudahood si lagu xaqiijiyo in xisaabaha kaydka guriga iyo wixii sanduuqyo ah la dhammaystiray.

7. Ka dibna waxaad kala dooran kartaa inaad halmar dhigista samayso ama inaad dhigis bille ah samayso adigoo ka soo wareejinaya bandhigaaga una soo wareejinaya HSB Bosparkonto ilmaha. Waxaad intaa kaddib sii wadi kartaa guri u kaydinta ilmahaaga.

Ka akhri wax badan oo kusaabsan sida xisaabaha dhigaalka guriga HBS u shaqeeyaan halkan ([hsb.se/stockholm/bospar/sa-fungerar-det/](https://hsb.se/stockholm/bospar/sa-fungerar-det/)).

### **Wareejinta kaydka guriga iyada oo la isticmaalayo BankID**

1. Booqo [www.danskebank.se/hsb](https://www.danskebank.se/hsb) oo dhagsii linkiga 'Flytta bosparande utan BankID' link.

2. Waxaa kadibna lagu waydiin doonaa dhawr su'aalood oo ay waajib tahay inay dhamaan baananku waydiiyaan macaamiishooda. Su'aaluhu waxay la xidhiidhaan sida aad u isticmaali doonto xisaabaha bangiga, iyo wixii lacago iyo adeegyo ah. Macluumaad kusaabsan sababta ay tahay inaannu su'aalo kuu waydiino waxaad ka heli kartaa halkan ([swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/](https://swedishbankers.se/foer-bankkunder/penningtvaett/daerfoer-maaste-banken-staella-fraagor/)). Ka dib dhagsii 'Fortsätt' button.

Xisaabaha iyo wixii sanduuqyo ah ee la dalbayo waxa lagu calaamadiyaa foomka mar dambe. Waxaad dooran kartaa inaad dhigto HSB Bosparkonto ama HSB Fasträntekonto, ama inaad dhigto sanduuqyada xisaabta haynta ilmaha. Waxa kuugu fiicani waxa uu ku xidhan yahay inaad kaydsanayso muddada dheer iyo ta gaaban, iyo halista weyn ee aad u badheedhayso.

Haddii aad dalbato HSB Depå för fondsparande, waxaad dooran kartaa inaad dhigto qadar bille ah sanduuqyada adigoo dhag siinaya 'Fonder att välja' kadibna sanduuqa(yada) aad rabto inaad ku maalgalisoo dhigaaladaada. Haddii aad rabto inaad dhigto HSB Fasträntekonto, waxaad u baahan tahay inaad kala xidhiidho Adeegga Macmiilka (0752 48 10 20).

3. Ku qor istillaab santuukha aqbalna in aad joojiso akoonkaaga kaydinta guriga ee Swedbank una wareeji Danske Bank. Sidoo kale muuji foom kasta oo kaydsi ah oo kale oo HSB Bosparkonto daada ah.

4. Sawir ama iskaan saar aqoonsigaaga (liisanka wadista gaadhiga, baasboor, ama kaadhka aqoonsiga), oo markaa soo dir (upload).

Bilow in aad sawirro uga qaaddo aqoonsigaaga teleefoonkaaga gacanta. Intaa ka dib waxa aad teleefoon kaaga gacanta ka gali kartaa ciwaan kaaga iimaylka waxaad na ku lifaaqi kartaa sawirrada iimayl aad adigu isu dirayso. Ka dib ka gal ciwaanka iimayl kaaga kombuyuutarka kuna kaydi sawirka kombuyuutarka. Intaa ka dib waxa aad ka sii wadi kartaa codsigaaga kombuyuutarkaaga adigoo riixaya batoonka 'Ladda upp dokument' ee u dhow qaybta hoose ee foomka. Gali sawirka.

5. Gudbi dalabkaaga adigoo dhag siinaya 'Skicka'. Intaa kadib waxaad heli doontaa xaqiijin sheegaysa in dalabkaagii la gudbiyey.

Waxaannu ku dadaali dalabka iyo aqoonsiga in lagu ansixiyo dhawr maalmaha la shaqeeyo ah. Haddii arjigaaga aad dhamaystirto, waxa aanu heshiis ku diri doonaa boosta isaga oo uu la socdo alaabta aad dalbatay. Waannu kula soo xidhiidhi doonaa haddii aannu u baahanno wax macluumaad oo dheeraad oo dalabka khuseeya.

6. Waxa aad akhridaa heshiiska si aad u xaqiiqiso in wax kastaaba saxan yahay, saxeex arjiga oo waxa aad soo celisaa heshiiska adiga oo kusoo diraya bushqada soo celinta. Warqad xaqiijineed ayaa laguugu soo diri dhawr maalmaha la shaqeeyo ah gudahood si loo xaqiijiyo in xisaabaha iyo wixii sanduuqyo ah la dhammaystiray.

7. Ka dibna waxaad kala dooran kartaa inaad halmar dhigista samayso ama inaad dhigis bille ah samayso adigoo ka soo wareejinaya bandhigaaga una soo wareejinaya HSB Bosparkonto. Waxa aad kadib sii wadi kartaa kaydka guriga.

Ka akhri wax badan oo kusaabsan sida xisaabaha dhigaalka guriga HBS u shaqeeyaan halkan ([hsb.se/stockholm/bospar/sa-fungerar-det/](https://hsb.se/stockholm/bospar/sa-fungerar-det/)).